# Casharka Koowaad

## SIGAARKA IYO DHIBAATADIISA

**Waa maxay sigaarku?** Sigaarka waxaa laga sameeya caleemaha tubaakada oo la qallajiyay dabadeedna xaashi lagu duuduubay. Sigaarka marka la cabbayo dab ayaa lagu shidaa sigaarka markaas ayaa la dhuuqaa. Dabadeedna qiiq fara badan ayaa soo galaya sambabada iyo hab-dhiska neefsiga ee qofka sigaarka cabba. Sigaarka waxaa ku jirta maaddo la dhoho nicoten. Maaddadaasi waxaa ay keenaysaa in qofka uu la qabsado cabbitaanka sigaarka.

**Maxaa keenaya in qofku sigaar u baahdo mar kasta?** Qofka marka uu la qabsado cabbitaanka sigaarka wuxuu qofkaasi mar kasta u baahanayaa in uu cabbo sigaarka. Haddii uu qofku sigaar cabbi waayo, markaas qofka wuu xaraaroonayaa. Xaraarada macneheeda waxaa weeye qofka oo maskaxdiisu ay u sheegayso in uu sigaar cabbo. Haddii uu qofka marka uu xaraaroodo uu sigaar cabbi waayo, markaas qofka wuxuu dareemayaa kacsanaan, madax-xanuun, culays, iyo wahsi.

Qofka wuxuu billaabayaa in uu hamaansado ama bishimuhu ay cuncunaan. Dabadeedna marka uu qofku sigaarka cabbo ayay calaamadahaasi baaba,ayaan. Dabadeedna xaraaradii mar kale ayay soo noqonaysaa, haddii uu qofku sigaar cabbi waayo xilligii uu qofku sigaarka cabbi jiray. Xaaladdaas meerto-meertada ah ayuu qofku ku noolaanayaa waligiis, illaa inta uu ka go,aansanayo in uu qofku sigaarka joojiyo gabi ahaanba.



**Dhibaatootinka caafimaad ee uu sigaarku keeno**: Marka uu qofku sigaarka dhuuqo waxaa qofka habdhiskiisa neefsiga gaar ahaan sambabada soo galaya qiiq fara badan oo sumaysan. Qiiqaas waxaa ka buuxa kaarboon iyo maaddooyin kale oo sun ah. Maaddooyinkaas waxay dhaawac u gaystaan sambabada. Qofka sigaarka cabba wuxuu qaadi karaa cudurro badan oo ay ka mid yihiin cudurka neefta, daalka, tabar yari iyo difaaca jidhka qofka oo yaraada. Sidoo kale qofka sigaarka cabba, sigaarkii ayaa mar kasta afkiisa iyo dharkiisa ka soo uraya. Ugu danbayn sigaaar cabbisktu waxaa ay keentaa cudurka kansarka oo qofka uga dhaca sambabka.

**Khasaaraha dhaqaale ee uu sigaarku keeno**:

Sigaarku wuxuu sidoo kale khasaare dhaqaale u gaystaa qofka sigaarka cabba. Qofka sigaarka cabba wuxuu maalin

kasta ugu yaraan u baahan yahay 5 doollar oo uu sigaar ku iibsado. Taasina waxay dhibaato ku tahay dhaqaalaha qofka sigaarka cabba iyo qoyskiisa. Haddii qofka markaasi uusan haysannin lacag uu sigaar ku iibsado oo qofkiina uu xaraaraysan yahay, waxaa dhici karta in qofkaasi uu isku dayo, inuu lacag ku helo sifo sharaf darro ah amse sharci darro ah, sida in uu qofku dadka shaxaado ama in uu lacag daynsado ama ugu danbayn uu lacag xado.




Sannadahan danbe cabbitaankii sigaarka aad ayay u yaraatay. Waxaana ugu wacan dadka oo ku baraarugay dhibaatada ay sigaar cabbistu leedahay. Laakiin nasiib darro wali dad badan ayaa sigaarka cabba. Waxaa jira dhallinyaro fara badan oo isku daya in ay tijaabiyaan cabbitaanka sigaarka. Laakiin dhallinyaradu waxaysan ogayn in marka uu qofku sigaarka cabbo uu maskaxdiisa ku reebayo la qabsi, oo markaasna ay ku adkaan doonto inuu mar kale iska joojiyo. Marka waxaa habboon in marnaba aadan tijaabinin cabbitaanka sigaarka. Sida ugu fiican ee sigaar cabbista lagu yarayn karo waa iyada oo dadka lagu wacyi galiyo dhibaatooyinka uu sigaarku u gaysto qofka iyo bulshada.

## LAYLISYO

### Qaybta 1aad: Erayada soo socda ku buuxi meelaha bannaan

**(dhaqaale, go,aansanayo, sambabada, cabbitaankii, baraarugay, Nicoten, kacsanaan, sumaysan, xaraaroonayaa, cudurro)**

Sigaarka marka la cabbayo dab ayaa lagu shidaa sigaarka markaas ayaa la dhuuqaa. Dabadeedna qiiq fara badan ayaa soo galaya _______________ iyo hab-dhiska neefsiga ee qofka sigaarka cabba. Sigaarka waxaa ku jirta maaddo la dhoho ______________. Haddii uu qofku sigaar cabbi waayo, markaas qofka wuu _______________. Haddii uu qofku marka uu xaraaroodo uu sigaar cabbi waayo, markaas qofka wuxuu dareemayaa ________________ iyo madax-xanuun. Xaaladdaas meerto-meertada ah ayuu qofku ku noolaanayaa waligiis, illaa inta uu ka _______________in uu qofku sigaarka joojiyo gabi ahaanba. Marka uu qofku sigaarka dhuuqo waxaa qofka habdhiskiisa neefsiga soo galaya qiiq fara badan oo ___________

Qofka sigaarka cabba wuxuu qaadi karaa ______________ badan. Sigaarku wuxuu sidoo kale khasaare ______________ u gaystaa qofka sigaarka cabba. Sannadahan danbe ____________ sigaarka aad ayay u yaraatay. Waxaana ugu wacan dadka oo ku ______________ dhibaatada ay sigaar cabbistu leedahay.

### Qaybta 2aad: Ka jawaab su,aalaha soo socda

1) Muxuu dareemayaa qofka marka uu sigaar u xaraaraysan yahay?

………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………

2) Ka sheekee dhibaatada caafimaad ee sigaarku u gaysto qofka sigaarka cabba?

………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………

3) Ka sheekee dhibaatada dhaqaale ee sigaarku uu ku hayo qofka iyo qoyska?

………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………

4) Sidee baa looga hor tagi karaa sigaar cabbista?

………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………

### Qaybta 3aad: Ku buuxi meelaha bannaan erayga meeleeyaha ah ee ku habboon.

(Sarraysa, gudaha, hoosta, dhexda, horta, gadaal, dusha, bannaanka)

1) Madax meel ka ______________ oo la salaaxo ma leh.

2) Shimbirta waxay saaran tahay geedka ___________________

3) Bisaddu waxay fadhidaa miiska ________________________

4) Sanbabka wuxuu ku yaallaa feedhaha ___________________

5) Sunniyaha waxay ku yaallaan indhaha ___________________

6) Sigaarka wuxuu ku jiraa baakidhka _____________________

7) Caanaha waxaa laga keenaa magaalada __________________

8) Batroolka waxaa laga soo saaraa dhulka _________________

9) Nalka wuxuu iftiimiyaa gaadhiga ______________________

10) Gaadhi-dameerka wuxuu ku xidhan yahay dameerka _______________